Ii sheeg wax Badan oo ku saabsan…
IRIS

Waa maxay IRIS?

IRIS waa barnaamij kuu oggolaada adigu inaad hagto adeegyadaada iyo taageerooyinka. IRIS waxay aqoonsatay inaad tahay qofka go'aanka ka gaadha noloshaada, ay ka mid tahay go'aan ka gaadhida hawlahaaga nolol maalmeedka iyo noocyada taageerada ama caawimada aad u baahantahay si loo buuxiyo baahiyahagaaga daryeelka ee mudada dheer. IRIS waxay ku salaysantahay qiyamka muhiimka ah ee iskaa go'aan u gaadhida. Qiyamkan waxaa ka mid ah:

- Xoriyada aad ku go'aaminayso sida aad doonayso inaad ugu noolaato noloshaada;
- Maamulka miisaaniyad gaar ah;
- Taageerada lagu habbeeyo ilaha qaabab nolosha horumarinaya oo macno buuxa kuu leh adiga;
- Masuuliyada isticmaalka xikmada leh ee maalka dad waynaha iyo aqoonsiga tabarucaadka aad siiso bulshadaada; iyo
- Xaqiijinta doorka muhiimka ah ee isku doodista.

Sidee IRIS U shaqaysaa?

Muuqaalka Guud ee IRIS.

Iskaa u hagida adeegyadaada waxay ku siin karaan qaab aad ku maamusho adeegyadaada iyo taageerooyinka. IRIS, maamulkaaga miisaaniyada la gaar yeelay ee ku saleysan baahiyahaaga la gaaryeelay. Ka qayb galayaasha barnaamijka IRIS waxay go'aan ka gaadhaan adeegyada loo baahday, taageerooyinka iyo alaabta gudaha miisaaniyadan. Ka qayb galayaasha IRIS adeegyada la qorsheeyay, waxay xushaan adeegyada adeeg bixiyayaasha iyo taageerada, oo waxay xushaan goobaha adeegyada. Marka ka qayb galayaasha ay shaqaaleeyaan daryeelayaashooda, ka qayb galayaashu waa inay raacaan xeerka Department of Health Services (DHS) ee ka mamnuuca daryeele keliya guud ahaan inuu shaqeeyo wax ka badan 40 saacadood todobaadkii.

Dadka ku nool xarunta degenaanshaha bulshadda ku saleysan (CBRF, Community Based Residential Facility), ama guriga daryeelka uma qalmaan IRIS, markay ku noolyihin goobahan.

Adeegyada Ka iibso Gudaha Qadarka Miisaaniyada La gaaryeelay.

Qadarka maal gelinta loo heli karo qorshahaaga waxaa lagu go'aamin doonaa natiijooyinka agabka loogu yeedho Baadhitaanka Shaqaynaya ee Daryeelka mudada dheer. Shaqaalaha ADRC (Aging and Disability Resource Center), waxay ku waydiin doontaa su'aalo ku saabsan kartiyahaaga, awoodaha iyo baahiyaha. Isaga ama iyaddu waxa uu gelin doonaa macluumaadka baadhitaanka shaqaynaya, oo baadhitaanku waxa uu xisaabin doonaa qiyaasta qadartka lacagta aad isticmaali karto si aad u samayso qorshahaaga sida loo buuxiyo baahiyahaaga daryeelka mudada dheer. Ka qayb galayaasha mustaqbalka ama hadda ee IRIS waxay

ka codsan karaan Waaxda (Department) habbaynta miisaaniyadooda hore, haddii aanay awoodin inay horumariyaan taageerada iyo qorshaha adeega wata la taliyahooda IRIS kaas oo ku jira miisaaniyada hore ee la qiyaasay.

Helida Guriga iyo Adeegyada Bulshadda Ku saleysan.

Adeeg bixiyayaashan taageerooyinka iyo adeegyada ee ka qayb galayaasha IRIS waxay ku helaan lacag bixinta wakaalada maamulka loo shaqeeyaha. Barnaamijka IRIS waxa uu ka koobanyahay qayb aad u ballaadhan adeegyada daryeelka mudada dheer ee guriga iyo bulshadda ku saleysan. Waxaad awoodi doontaa inaad isticmaasho kaadhka Medicaid wixii ah adeegyada Medicaid daboosho.

Qorshee Daryeelkaaga Gaarka ah.

Qof kasta oo doorto inuu ka qayb galo IRIS wax auu doortaa wakaalada la talinta IRIS. Wakaaladan waxay kormeertaa oo taageertaa shabakada la taliyayaasha IRIS. La taliyaha IRIS waxay ku bari doontaa barnaamijka IRIS iyo fikrada is hagida, siiba kugu hagi doontaa adiga dhexda qorshaha horumarinta iyo tallaabooyinka u dambeeya gudaha nidaamka diiwaangelinta IRIS. La taliyaha IRIS waa uu kula shaqayn doonaa adiga, iyo qof kasta oo kale oo caawimo ku siinaya adiga, si loo horumariyo oo loo oggolaado qorshaha hore ee IRIS. Qorshahan waxaa lagu horumariyaa iyaddoo ahmiyada la saarayo hadafyada daryeelka mudada dheer iyo aqoonsashada taageerooyinka dabiiciga ah iyo kuwa lacagta la bixiyo. Intaa waxa dheer, qorshahu waxa uu wax ka qaban doonaa caafimaadkaaga iyo badbaadada. La taliyaha waxa uu xaqiijin doonaa in warqaddaha shaqo ee lama huraanka ah la dhammaystiray oo waxa uu ku siin doonaa adiga caawimo joogto ah iyo taageero ka dib markaad isku diiwaangeliso barnaamijka. Adeegyada la taliyaha IRIS waxaa qandaraaska siiya Gobolka Wisconsin kharash iyadoon ku joogin ka qayb galaha IRIS.

Helida Shaqaalaha.

Waxaa jira dhowr qaab oo lagu helo shaqaale si ay u bixiyaan adeegyo sida daryeelka taageerada guriga, nasashada, tababarka shaqada, ama daryeelka gaarka ah. Dadka doorto IRIS waxay leeyihiin xuquuqo kala duwan iyo masuuliyo ku saleysan ikhtiyaarada la doortay. Qof kastaa waxa uu dooraan karaa:

- Inuu helo loo shaqeeye oo u shaqaaleeyo shaqaale si toos ah (wakiilada loo shaqeeya sidoo kale waxay u shaqeeyaan sidii wakiilo loo shaqeeye oo waxay shaqaalaha mushaharka ku siiyaa xaashida wakhtiga la soo gudbiyay). Kuwan waxaa sidoo kale loo tixraaca sidii "ka qayb galayaasha shaqaalaha la shaqaalaysiiyo."
- Si loogu maamulo shaqaalahooda caawimada wakaalada leh doorashada adeeg bixiyaha (tusaale, waxaad caawisaa xulashada shaqaalaha).
- Kula talisaa shaqaalaha in la shaqaaleeyo oo ay maamulaan wakaalada kiraynta.
- Isticmaashaa wakaalada adeeg bixiya si ay u bixiso adeegyada aad u baahantahay addoo isticmaalaya shaqaalaha u ah shaqaale iyaga.

Daryeelka Gaarka ee Iskaa u hagida

Qorshaha adeega waa la horumarin doonaa iyaddoola isticmaalayo nidaamka qofka ku kooban ee dhisa dookhyaraada iyo kartiyaha.

Dadka doorta IRIS sidoo kale waxay haystaan ikhtiyaarka ay ku doortaan daryeelka gaarka ah ee wakaalad ku saleysan ama is hagida daryeelkooda gaarka ah. Haddii aad doorato ikhtiyaarka Daryeelka Gaarka ee Iskaa u hagida, waxaad maamuli doontaa miisaaniyada daryeelkaaga gaarka ah taas oo ah marka lagu daro miisaaniyada IRIS. Qadarka miisaaniyada waa la go'aamiyaa iyaddoo la isticmaalayo agabka Baadhitaanka Daryeelka Gaarka ah ee isku midka ah ee loo isticmaalo daryeelka gaarka ah ee ku saleysan wakaalada. Qadarka miisaaniyada waxaa keliya loo isticmaali doonaa daryeelka gaarka ah ama waxyaabaha kale ee gaarka ah ee la xidhiidha. Qodobada kale ee muhiimka ah ee dheeraadka ah waxaa ka mid ah:

- Waxaad awood u yeelan doontaa inaad shaqaalayso, kormeerto, maarayso oo aad erido shaqaalahaga daryeelka gaarka ah qaabab la mid ah kuwa aad u maamusho shaqaalaha IRIS. Tan waxaa ka mid ah isticmaalka wakiilka shaqaalaha IRIS (FEA, fiscal employer agent) sidoo wakaaladaada shaqaalaynta ama iyaddoo la isticmaalaoyo wakiilka iibinta shaqada la wada qabto. (La taliyahaaga IRIS waxa uu sharaxi karaa ikhtiyaarada.)
- Waxaad lahaan doontaa debecsanaanta aad isugu duba rido daryeelka gaarka oo wata daryeelka taageerada guriga, gaadiid raaca iyo adeegyada kale, oo waxaad u isticmaali kartaa miisaaniyadaada daryeelka gaarka ee iskaa u hagida IRIS wixii ah daryeelka gaarka ah gudaha goobta bulshadda ka baxsan gurigaaga.
- Waxaad isticmaali kartaa IRIS kaaga miisaaniyada daryeelka gaarka ee iskaa u hagida si aad u iibsato waxyaabo gaar ah oo kordhiya madax banaanida ama beddela caawimada aadamaha. Tusaale ahaan, kursiga qaadista kuu oggolaan doonaa inaad meel kale gaadho caawimo la'aan.
- Waxaad dooran kartaa wakiil si uu kaaga caawiyo adiga, hagitaanka adeegyadaada IRIS daryeelka gaarka ah ee iskaa u hagida.

Si waafaqsan sharciyada barnaamijka, kalkaaliso waxay ka qayb gashaa horumarinta qorshaha daryeelka gaarka ah sidii qaybta Daryeelka Gaarka ah ee iskaa U hagida ku jira IRIS. Kalkaalisada Daryeelka Gaarka ah ee iskaa U hagida waxay kaa caawin doontaa inaad horumariso qorshaha adeega Daryeelka Gaarka ah ee iskaa U hagida. Tan waxaa lagu daraa qorshahaaga IRIS. Qorshaha adeega waa la horumarin doonaa iyaddoo la isticmaalayo nidaamka qofka ku kooban ee dhisa dookhyadaada iyo kartiyaha oo ka qayb qaadan karaan shakhsiyaadka kale ee doorashadaada ah.
Taageerada kalkaaliska joogtada ah waa la heli doonaa si loo xaqiijiyo caafimaadka iyo badbaadada, inta ugu yar si sanadle ah. Kalkaalisada IRIS waxay dhammaystiri doontaa baadhitaanka daryeelka gaarka ah ugu yaraan si sanadle ah inta badana haddii xaaladaadu ay isbeddesho:

Fadlan ogow in Daryeelka Gaarka ah ee Iskaa u hagida aan la heli karin marka aad ku nooshahay goob koox degto sida guriga qoyska dadka waa wayn. Haddii aad go'aan ku gaadho inaad isticmaasho wakiilka Daryeelka Gaarka ah ee iskaa U hagida ku jira IRIS, markaa sidoo kale uma isticmaali kartida sidii adeeg bixiye daryeelkaaga gaarka ah. Intaa waxa dheer, kama qayb geli kartid wax daryeel wakaalad ku saleysan oo gaar ah dhexda kaadhkaaga Medicaid ForwardHealth iyo Daryeelka Gaarka Iskaa u hagida IRIS waqti isku mid ah.

Lacagta la isugu soo Dubariday Adeeg bixiyayaasha.

Ka qayb galaha IRIS waxa uu heli karaa wakiilka loo shaqeeyaha iyaddoonay kharash ku joogin isaga ama iyadda. Wakaaladan waxay daryeeshaa mushar bixinta, iyo shuruudadaha kala ee warqadda shaqo ee dhaqaale ee loo shaqeeyaha la xidhiidha. Wakiilka loo shaqeeyaha ayaa lacagta siiya dadka adiga kuu shaqeeya iyo ganacsiyada ama adeeg bixiyayaasha alaabta kuu soo dira iyo adeegyada sida lagu oggolaaday qorshaha IRIS.

Ma dooran kartid urur la mid ah inuu bixiyo adeegyada ICA (IRIS consultant agency)/FEA kuwaas oo sidoo kale ku siiya adeega lacagta la bixiya adiga sida daryeelka gaarka ah ama gaadiid raaca. Haddii xaaladan ay dhacdo, la taliyaha wakaalada IRS waxa uu kula wadaagi doonaa adiga macluumaad oo waxaad lahaan doontaa fursada aad ku gaadho go'aanka ICA ama FEA adiga aadka kuugu fiican. Waxaa laguu gudbin doonaa ADRC haddii aad go'aan ku gaadho inaad sahamiso ICA kale.

Qoraala-deyda iyo Su'aalaha.